


Goobta daryeelka oo Bisha Cas oo Quseyso dadka ku soo dhaawacmay dagaal iyo jir dil



SOM



Svenska Röda Korset



Ku soo dhawow goobta daryeelka oo Bisha Casoo loogu talagalay dadka ku soo dhaawacmay dagaal iyo jir dilid oo goobtas waxaa ka heli dhex bartamaha magaalada Malmö!

Waa suurtagal in adiga oo hada warqadan gacantaada ku haayo aad dareemeysid caafimaad daro maadaama aad la soo kulantay dagaal iyo/ama jir dilid oo taasna sabab u eheed inaa wadankii hooyo ka soo qaxdid/haajirtid.

Anaga oo shaqaalaha joogo goobta daryeelka waxaa kala nahay dhakhtarka cilmi nafsiga, shaqaalaha jir dib u tababarida, shaqaalaha talo bixinta, dhakhtar, turjumiyo shaqaalaha maamulida xafiiska. Warqadan waxaa ku qoran warbixin ku saabsan habka aan daryeelka kuu siin.

Kulanka koowad iyo qiimeynta

Waa suurtagal in adiga horeyba uga la soo hadashay dhakhtarka ama shaqaalaha kale oo joogo goobaha daryeelka, oo ayagaas kala soo hadashay caafimaad darada aad daremeysid iyo ayaga baa adiga ku soo gudbiyen goobta aan anaga joogno. Marka warqada dalabka[remissen] oo iney ku soo gudbiyeen anaga na soo gaarto adiga waxaan ku saf sida marka ey toogtaada noqoto daryeel caafimaad kuu siino. Waxaan aad uga xun nahay in safka dad badan ku jiran oo taasna micnaheeda tahay wakhti dheer na sugi doontid.

Marka ey toogtaada noqoto adiga waxaad la kulmidoonta dhakhtarka cilmi nafsiga. Kulanka koowad adiga waxaad warbixin naga siin caafimaadkaada sida aad daremeysid iyo waxyaabaha sababta u ah inaa caafimaad daro daremeysid. Anaga waxaan adiga ku siin warbixin ku saabsan habka aan daryeelka kuu siin. Waxyaabaha daryeelka ugu muhiimsan waxaa kamid ah in adiga ka sheekeysid waxyaabihii xuma/adkaa oo adiga la soo kulantahay. Haddii adiga u maleyneysid iney ku caawineyso haddii aad qof kala sheekeysatid wixii aad la soo kulantay, markas dhakhtarka cilmi nafsiga wuxuu adiga ku siin wakhti ballan cusub sidii xaaladaada loo sii qiimeyo.

Qiimeynta labaad waxaa la suubin baaritan ku saabsan waxyaabahii xumaa aad la soo kulantay iyo habka ey kuu saameynta wakhtigan hada la joogo. Markas kadib baa adiga iyo dhakhtarka cilmi nafsiga isla go'aamineysin haddii adiga bilaabaysid ka qeybqaadasho daryeel. Adiga waxaa xita la kulmi shaqaalaha jir dib u tababarida, shaqaalaha talo bixinta iyo dhakhtar haddii loo baahdo.

Daryeelka

Daryeelka micnaheeda waxey tahay in adiga aad ugu yaran 1 jeer isbuuci u baahantahay inaa imaatid goobta, caadiya dhowr jeer isbuuci oo waxey ku xirantahay imiso shaqaalo oo daryeel bixiyo oo adiga u baahantahay inaa la kulantid iyo haddii adiga kooxyada isla kulmo aad kamid tahay. Daryeelka waa wada shaqeyn ka dhaxeeyso adiga iyo shaqaalaha daryeelka ku siin iyo waa muhiim in adiga si firfircooni le huga qeybqaadatid daryeelka oo markas waa suurtagal inaa natiijo fiican gaartid. Mark aad la kulantid dhakhtarka cilmi nafsiga, shaqaalaha jir dib u tababarida, shaqaalaha talo bixinta iyo dhakhtarka waxaa la suubin qorsho daryeelid[vårdplan]. Warqada oo qorsho daryeelida waxaa lagu qori waxyaabaha adiga dhibka kugu ah, habka la doortay in lagu daryeelo, adiga hadefyada aad dooneysid inaa gaartid iyo habka aad hadefyadas u gaareysid. Wey adagtahay in la qiyaaso ilaa inta uu daryeelka socon laakin daryeelada inta ugu badan waxey qaatan 1 sano.

Waxaa hoostan ka heli warbixin kooban oo ku saabsan habka daryeelka loo suubin.


Dhakhtarka cilmi nafsiga

Daryeelka aad ka heleysid dhakhtarka cilmi nafsiga waa mid oo wada hadlid, taasna micnaheeda tahay inaa ka wada hadli doontiin waxyaabihii xumaa/adkaa oo noloshaada la soo kulantay. Caadiyan in qofka ka walwalo inuu ka hadlo waxyaabahii ku soo dhacay oo waa shaqada dhakhtarka cilmi nafsiga inuu keeno habkii aad arrimahas uga wada sheekeysan laheedeen. Daryeelkan waxaa culeyska saareysiin inaa fahantid cilada ku hayso, waxa sababta u ah iyo waxyaabaha aad suubinkartid sidaa wax uga badashid. Daryeelida aad ka heleysid dhakhtarka cilmi nafsiga waa mid shaqsi ahaan. Adiga iyo qofkas waxaa wada kulmeysiin 1 jeer isbuuci.




Shaqaalaha jir dib u tababarida

Shaqaalaha jir dib u tababarida wuxuu adiga kaa caawin farsamo kala duwan oo nusqaamin cadaadiska aad dareemeysid, walwalka, walbahaarka iyo xanuunka aad dareemeysid iyo inaa bilaawdid jir tababarid. Daryeelka aad ka heleysid shaqaalaha jir dib u tababarida waa mid shaqsi ahaan iyo/ama koox ahaan, oo tusaale ahaan suubinta yoga, isboorti iyo biyo lagu dhex dabaalan. Idinka waxaa wada kulmeysin 1 jeer isbuuci ama ka badan haddii aad koox kamid noqotid.




Shaqaalaha talo bixinta

Shaqaalaha talo bixinta wuxuu suubin baaritan ku saabsan arrimaha sida guri, dhaqaalaha iyo xaalada qoyska. Shaqaalahas adiga wuxuu kaa caawin kara la xiriirida shaqo-bixiye, xafiiska u adeegida bulshada[socialtjänsten], hey'adda socdaalka[migrationsverket] iyo xafiisyo kale. Shaqaalaha talo bixinta wuxuu xita kaalmo siinkara ehelkaada oo ayaga wuxuu warbixin ka siin kara sida dadka oo xaalado adag la soo kulmay ey noqdan. Haddii aad carruur haysatid waa suurtagal in canuga horey kuu soo raacikaro oo dhaqdhaqaaqa Bisha Cas[Röda Korset] carruurta u suubiso buu canuga xilligas ka qeybqaadan kara.



Dhakhtarka

Dhakhtarka iyo adiga waxaa isla wada firineysiin daawooyinka aad u baahantahay iyo wixii daryeel oo goobaha caafimaadka oo iswiidhan ka heshay ilaa maalintii aad wadanka imaatay. Haddii loo baahdo daryeelid daawo waad heli iyo waa lagu guddin haddii daryeel qaas u baahantahay oo waxaa dalab qoraal loo diri qeybta isbitaalka ku shaqo leh.



Gebogebo

Haddii adiga wali aad baahi u qabtid marka daryeelka anaga ku siinay kuu dhammaado waxaan kuu gudbin qeybta isbitaalka oo adiga markas ku siin karto daryeelka aad u baahantahay.

Svenska Röda Korsets behandlingscenter för krigsskadade och torterade, Malmö

– med filial i Hässleholm

Besök: Drottninggatan 2C, Malmö

Postadress: Box 166, 201 21 Malmö

Vallgatan 18, 281 32 Hässleholm

Telefon 040-32 65 30

Mejl rkc.malmo@redcross.se



Svenska Röda Korset

Svenska Röda Korset

Infoservice 0771-19 95 00

E-post: info@redcross.se | www.rodakorset.se